

## **Xafiiska Hawlgalka Qaramada Midoobay ee Kaalmaynta Soomaaliya (UNSOM)**

### **Faafin Degdeg ah**

#### **WARSAXAAFADEED 36/2014**

### **Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya oo aad uga walaacsan dilalka loo geysto xildhibaanada Soomaaliyeed**

**Muqdisho, 1da Agoosto 2014** – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya (SRSG), Nicholas Kay, ayaa cambaareeyay dilka maanta loo geystay Sheekh Aadan Madeer, oo ah Xildhibaan ka tirsan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, wuxuuna muujiyay walaaca uu ka qabo weerarrada isdabajooga ah ee lagu hayo xildhibaanada.

Md. Madeer waxaa lagu dilay magaalada Muqdisho. Wuxuu ahaa Guddoomiyaha Guddiga Maaliyadda ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Md. Madeer waa Xildhibaan kii shanaad ee la dilo sannadkan 2014.

“Dilka loo geystay Sheekh Aadan Madeer waa fal laga fajaco,” ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah Nicholas Kay. “Dilalka lagu kacayo xildhibaanada waa iskuday la doonayo in lagu cabsigeliyo laguna niyadjebiyo dadka ku hawlan inay dhisaan Soomaaliya oo sidan ka wanaagsan. Laakiin kuwa geysanaya dilalkan ma gaari doonaan ujeeddadooda.”

“Waxaan xildhibaanada Soomaaliyeed ku amaanayaa geesnimada iyo hawl karnimada ay muujiyeen iyagoo weerarro isdabajoog ah lagu hayo. Qaramada Midoobay waxaa ka go’an inay taageerto hawlaha muhimka ah ee uu hayo Baarlamaanka Federaalka,” ayuu raaciyay. “Waxaa loo baahanyahay in tallaabo degdeg ah laga qaado si kuwa dilkan ka dambeeyay caddaaladda loo hor keeno.”

Ergeyga Gaarka ah wuxuu tacsii tiiraanyo leh u diray qoyska iyo saaxiibada Md. Madeer, iyo weliba Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.